

dabeysshaqaboobaha

Xaqiiqada: Agagaarka Seattle waxaa saameeyn ku yeesha cimilo daran oo qaboow. Barafko oo bata iyo heer kulka qabowgu waxey wax u dhimi karaan gaadiidka caadiga ah, taas oo ay xaddido awoodda gaadiidka gurmada degdegga si ay u garaan goobta, waxeyna waxyeelo u geysaneysaa dadka qaba dhibaatooyinka caafimaad daro ee joogtada ah. Inta lagu guda jiro qabow muddo dheer socda, waxa laga yabaa in tuubooyinka guriga ay baraf noqdaan taaso oo dhaawac u geysan karta guryaha.

Maxaa la sameeyaa:

- Iska dul Xiro dhowr dhar, dharkuna qaleyh ha kuu ahaado. Xiro koofiyad si looga hortago in kulka jirku lumo.
- Isticmaal waxyaabaha barafka lagu dhalaaliyo si barafku uga dhalaalo wadada la maro ama lagu socdo.
- Keyd fiican dhigo sida raashinka iyo agabka - waxay qaadan kartaa waqti inta dukaamadu ay dib-u-furmayaan.
- Iska ilaali culays xad dhaaf ah markaad barafka cad isk xaageyso. Riix barafka halkii aad ka qaadi laheyd haddii ay suurtagal tahay.
- Waxaad Filataa dib u dhac xaga safarka iyo isbedel ku yimaada jidadka gaadiidka dadweynaha ee caadiga ah.
- U diyaar garow in ay korontadu tagto, waana in aad ka taxadarto marka aad isticmaaleyso hababka aad u isticmaaleyso in aad ku bedelato qaab kale oo aad wax ku kululeysaneyso.
- La soco raadiyaha si aad ula socoto akhbaraadka degdeg ah.
- ***Haddii aad garaneyso qof aan awoodin in uu fahmo, arko, ama aan maqlin farriintan, fadlan u sheeg waxa ay ku saabsantahay.***

Xiriir kale ee ku caawinaya:

<http://www.seattle.gov/emergency-management/what-if/hazards/snow-ice-and-extreme-cold>

<http://www.seattle.gov/light/sysstat/>

<http://www.ready.gov/winter-weather>

<http://www.redcross.org/prepare/disaster/winter-storm>